

# SAMAYNTA QURMINKA QASHINKA CUNTADA EE GANACSIYADA

## Sharciga Walxaha Dabiiciga ah ee Washington



Laga bilaabo Janaayo 1, 2026, makhaayadaha ku yaal Federal Way waxaa looga baahan yahay inay qashinka cuntada u diraan qurmin sida uu dhigayo Sharciga Gobolka Washington HB1799.

Ganacsi kasta oo leh 96 galoon oo qashinka cuntada ah toddobaadkii waa inuu haystaa adeeg ururinta qurminta.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan sharcigan waxaa laga heli karaa bogga internetka ee Department of Ecology (Waaxda Bay'ada).



## Tallaabooyinka Ganacsiyada:

- 1 Aasaas adeeg.** Laba shirkadood ayaa bixiya gaadiidka qurmin-ka dibadda iyo durbaasyo waxayna sameeyaan ururin toddobaadle ah. La xiriir si aad u ogaato qiimaha.
  - Waste Management: [wmnorthwest.com/federalway](http://wmnorthwest.com/federalway)
  - Cedar Grove: [cedar-grove.com](http://cedar-grove.com)
- 2 U qoondee ururinta gudaha.** Dalbo agabka oo ay ku jiraan:
  - Weelasha qurmin (midabka cagaar ayaa la doorbidaa)
  - Calaamado iyo sharootoyinka
  - Xaashiyo lagu oggolaaday oo qurmin lagu isticmaalo (ikhtiyaari)
- 3 Shaqaalaha tababar** si ay u fahmaan waxa lagu qurmin karo si ay si sax ah u kala saaraan. Shaqaalaha tababar si ay weelasha gudaha ugu shubaan gaadiidka qurmin-ka dibadda ugu yaraan hal mar maalintii. La xiriir Magaalada Federal Way si aad u hesho taageero tababar.



# Maxaa lagu qurmin karaa?

## Qashinka ardaaga



## Haraaga cuntada iyo cuntada soo hartay

(OO AY KU JIRAAN HILIBKA, CAANAHA & LAFAHA)



## Warqadaha wasakhaysan ee aan dahaarka lahayn



Sheeyaasha loo aqbalo ururinta qurmin-ka waa qashinka cuntada (oo ay ku jiraan hilibka, caanaha & lafaha), iyo alaabo warqad aan dhalaalayn.

Marka aay timaado Federal Way, sheeyaasha waxaa loo qaadaa xarun qurmin oo deegaanka ah si loogu beddelo ciid 8 toddobaad gudaheed!

## Magaalada Federal Way way kaa caawin kartaa!

Waaxda Federal Way Environmental Services (Adeegyada Deegaanka ee Magaalada Federal Way) waxay leedahay barnaamijyo bilaash ah oo ka caawiya ganacsiyada.

Taageerada bilaashka ah waxay ka koobantahay:

- Weelasha ururinta qurmin-ka gudaha (ilaa alaabta ay ka dhammaato)
- Calaamadaha Kala-saarista ee Qurmin-ka, Dib u warshadaynta, iyo Qashinka
- Tababar lala yeesho khubarada qurmin-ka
- Ilaha taageerada dheeraadka ah

limayl [recycle@federalwaywa.gov](mailto:recycle@federalwaywa.gov) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.



Nala soo xiriir si aad u hesho kontaynar bilaash ah.

*\*ilaa alaabta ay ka dhammaato*